# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

## *DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA*

## لـولايــة أرض بــونـت الــصــومــال

Sannadka 2 aad      Garoowe,    23 Janaayo 2000      **Lam. 1**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA**      جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

---

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

---


## TUSMADA

### Qaybta Koowaad

### Sharci


- **Sharci Lam.** 1 ee 23/01/2000, kuna saabsan nabadgelyada guud — Bogga. 1
- **Sharci Lam.2** ee 23/01/2000, kuna saabsan Horumarinta Daaqa — Bogga. 10
- **Sharci Lam.3** ee 23/01/2000, kuna saabsan dhulka Beeraha — Bogga 15
- **Sharci Lam. 4** ee 23/01/2000, kuna saabsan Anshaxa Falimada — Bogga. 21
- **Sharci Lam. 5** ee 23/01/2000, kuna saabsan Wakaalada W/ (PUNA. — Bogga. 24


### Qaybta Labaad

### Xeer


- Xeer sharci Madaxweyne L.1 ee 5 Jannaayo 2000 kuna saabsan masuulnimada Wasaarada cadaaladda ee garsoorka Puntland — Bogga. 28


### Qayta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

Waxba ma lah

**DAWLAD G.PUNTLAND EE SOOMAALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka, Isgaarsiinta iyo Boostada
Ministry of information, culture, telecommunications & Post

Ref.___________ Date. 23 Janaayo. 2000

**Qaynuun Lam. 5**

**Qaynuunka Dhismaha Wakaaladda Wirarka Puntland.(PUNA)**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**

| | |
|---|---|
| Markuu arkay Axdiga | Dawladda Putland Qod. 12.1 |
| Markuu arkay | Go'aanka Golaha Wasiirrada |
| Markuu dhegeystey | Soo jeedinta Wasiirka W.DH. B. I. |
| Markuu Tixgeliyey | Baahida loo qabo dhisidda Wakaaladda Wararka Dawladda Puntland (PUNA). |

**Wuxuu Soo Saaray Qaynuunka Soo Socda.**

**Qodob. 1aad**
**Magaca Wakaaladda iyo Xarunteeda.**

1.1 Magaca Wakaaladda waa:- Wakaaladda Wararka Puntland (PUNA) ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta, waana Wakaalad Rasmi ah oo xarunteedu noqoneyso Garoowe.

**Qodob. 2aad**

2.1 Wakaaladdu waa ay madax banaan tahay, waxayna u xilsaaran tahay in ay wararka, siyaasadda,dhaqaalaha, dhaqanka bulshada, fanka iyo suuggaanta, cilmi baarista, ciyaaraha, horumarinta iwm. Ka hesho xog ogaalna u noqoto wararka, sawirrada, reboorrada ku saabsan dhinac kasta Dalka gudihiisa iyo dibaddiisa.

**Qodob. 3aad.**
**Madax Bannaanida Wakaaladda.**

3.1 Wakaaladdu waxay u madax bannaantahay doorashada, xulushada wararka, macluumaadka iyo qaybintooda.

**Qodob. 4aad**

4.1 Wakaaladda Warfaafinta Puntland, waxay awood u leedahay iney iskaashi iyo wax wada qabsi la yeelato Wakaaladaha qoomiga ah iyo kuwa caalamiga ah.

**Qodob. 5aad**
**Laamaha Wakaaladda.**

5.1 Wakaaladdu waxay u madax bannaan tahay in ay Xafiisyo iyo laamo ka furato meelihii ay daneyneyso markay u baahato ama suura gal u noqoto dalka gudihiisa

**Qodob 13aad.**

**Luqadaha**

12.1 Wakaaladda (PUNA), luqadaha rasmiga ah oo ay ku shaqayneyso waa Af Soomaali iyo Carabi.

13.2 Wakaaladdu waxay ku soo saari kartaa warar afaf kale oo caalamiya iyo afkii kale oo ay u baahato.

**Qodob. 14aad.**

**Kor U Qaadidda Heerka Aqooneed Iyo Farsamo.**

14.1 Wakaaladdu waa in ay dhirri geliso kor u qaadidda heerka aqoonta iyo farsamada hawlwadeenkeeda, lana saan qaado isbeddelka horumarka teknolojiyada.

**Qodob. 15aad.**

**Buritinta Qawaaniinta Ka Hor Imaneysa Qaynuunkan.**

15.1 Waxa la buriyey Qaynuun kasta oo ka hor imaanya ama aan la socon Karin qaynuunka.

15.2 Wakaaladda (PUNA) waxa lagu maamulayaa sharciga warbaahinta Puntland, xagga faldembiyeedka.

**Qodob. 16aad**

**Dhaqan Galka.**

16.1 Qaynuunkani wuxuu dhaqan gelayaa markii ay oggolaadaan Golaha Wakiillada Madaxweynaha Dawladduna saxiixo oo faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.

Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland
Cabdulaahi Yuusuf Axmed

(2)

## Qodob. 6aad.

6.1 Wakaaladdu waxay awood u leedahay in ay xubin ka noqoto midowga Wakaaladaha Gobollada iyo mid gooni ah oo leh mabadi iyo ujeedooyinka aan ka soo horjeedin mabad'ida Wakaaladdu ku dhisan tahay.

## Qodob. 7aad.
## Maamulka Wakaaladda.

7.1. Wakaaladdu waxay yeelaneysaa Madaxeybeed hoos yimaada Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta, waana in uu leeyahay shahaado sare ee cilmiga Warfaafinta iyo khibrad aan ka yareyn toban sano

## Qodob. 8aad

8.1 Madaxqaybeedku wuxuu u xilsaaran yahay habsami u fulinta hawlaha iyo ujeeddooyinka ee Wakaaladda isagaana uga mas'uul ah.

## Qodob. 9aad.
## Qaybaha Wakaaladda.

9.1 Wakaaladda Wararka Puntland (PUNA) waxay yeelaneysaa qaybaha soo socda:-

a) Qaybta Wararka - Gudaha iyo Dibadda.
b) Qaybta Riboorrada (Reports).
t) Qaybta Tarjamada.
j) Qaybta Bulletiinka mid maalinle ama waqtile ah.
x) Qaybta dhegeysiga Raadiyowyaasha, Internet iyo Akhrinta Wargeysyada kala duwan.
kh) Qaybta maraajicda, laybareeri (Library) iyo kaydinta qoraallada.

## Qodob. 10aad.
## Khidmada Qaadista Wakaaladda.

10.1 Wakaaladdu, waxay soo saareysaa sicirka khidmadda ay ka qaadaneyso hawlgalkeeda dhinac wararka iyo dhinac Reboorro.

## Qodob 11aad

11.1 Wakaaladdu, waxay weriyeyaal ku yeelan kartaa Dalka gudihiisa iyo dibadda.

## Qodob 12aad

12.1 Wakaaladdu waxay u diran kartaa goobaha caalamka oo ay ka socdaan warar iyo

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

*XAFIISKA MADAXWEYNAHA*

*OFFICE OF THE PRESIDENT*

---

Xeer-Sharci Madaxweyne No: **1** Janaayo **5,2000**

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda Puntland Qodabadiisa 19 iyo 23,

**MARKUU ARKAY** Xeer-Nidaamka Xukuumada & Hay'adaha Madaxa-Banaan,

**MARKUU DHAGEYSTAY** taladii Garyaqaanka Guud ee Dawladu ka bixiyey hawlaha iyo wada shaqaynta Garsoorka, iyo Wasaraadda Cadaaladda iyo Arrimaha Diinta,

**MARKUU DHAGESTAY** talo soo jeedintii Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, iyo Wasiirka Cadaaladda & Arrinta Diinta,

**SI LOO DHOWRO** Axdiga iyo Qawaaniinta kale ee Dawladda,

## WUXUU GO'AAMIYEY:

1. In Gudiga Sare ee Garsoorku, sida Axdigaba ku qeexan, u xilsaaraan yahay magacaabidda, shaqo-gelinta, beddelka, dallacsiinta iyo anshaxa iyo abaal marinta garsoorayaasha iyo shaqaalaha kale ee garsoorka.

2. Magacaabidda, shaqo-gelinta, beddelka, dallacsiinta, anshaxa iyo abaal marinta garsoorayaasha iyo shaqaalaha kale ee garsoorka waxay ansax tahay marka Madaxweynaha Dawladu ogolaado si rasmi qoraal ah. Madaxweynaha ayaa loo soo gudbinayaa arrimahaas Qoraal ahaan iyadoo la raacayo hab-maamul Wasaaradeed.

DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

NAFIISKA MADAXWEYNAHA

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

***THE OFFICE OF THE PRESIDENT***

3. Garsoore Dawladeed wuxuu dalka Puntland ka hawlgali karaa markay u sugnaato si rasmi ah qoraal Xeer-Sharci Madaxweyne. Sidaas darteed, waxaan waafaqsanayn sharciga guddoonka iyo hawlaha Garsoore kasta ee aan hore ku soo bixin Xeer-Sharci Madaxweyne.

Waxaa ka reeban Maxkamadaha iyo Garsooreyaashaba Puntland in hawlahooda iyo go'aannadoodaba samayn ku yeeshaan siyaasad, eex, falsafado ama aragtiyo kooxo diinneed, siyaasadeed, idaloojiyo, iwm.

5. Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Diinta iyo hay'ad kasta ee Dawladdeed, sida ku qeexan Axdiga, ma fara gelin karto Go'aannada Maxkamadaha.

6. Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Diinta ayaa mas'uul uga ah Dawladda arrimaha siyaasadda, awqaafta, maamulka, iyo u soo gudbinta Madaxweynaha Dekreetooyinka Magacaabidda Garsoorayaasha.

7. Xeer-sharcigaani wuxuu burinayaa (Nil & Void) wareegto kasta ee Madaxweyne oo ka hor imaaneysa Xeer-Sharcigaan No: **1**

Guul Eebe & hawlgal wacan.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**<u>Saxid</u>**

**Xeer sharci L. 63 ee ku soo baxay**
**Warsidaha Puntland 12 / 1/2000.**
waa in loo akhriyaa sidan : -
**Xeer Sharci L . 1 ee 5/1/2000**

2.8



Madaxtooyada Dawladda Puntland, Bosaso, Fax: (252-523)-4801; Garowe, (252-944)-6503